

Waa maxay Isticmaalaha Idman?

Isticmaalaha idman waa qof aad dooran karto in aad u oggolaato gelidda akoonkaaga WA Cares Fund si uu kaaga caawiyo tilmaamaha aad sheegto isaga oo haysta oggaanshahaaga dhan, oggolaanshaha, iyo xakameynta.

Muxuu Isticmaalaha Idman sameyn karaa?

Iyada oo ay jiraan oggaanshahaaga iyo oggolaanshahaaga, tilmaamaha aad sheegtay, iyo adiga oo kantaroolaya isticmaalaha Idman wuxuu:

- Geli karaa akoonkaaga barta internetka ee WA Cares iyagoo adeegsanaya xogta ay ku galayaan.
- Kaa caawin karaa gelidda iyo hagidda akoonkaaga WA Cares ee barta internet-ka, oo ay ku jirto buuxinta foomamka iyo arjiyada barta internetka iyo sameynta xulashooyinka akoonka WA Cares ee ku saabsan dheefahaaga WA Cares iyada oo loo marayo borafaylkooda isticmaalaha gaarka ah.
- Heli karaa macluumaadkaaga ilaalinta HIPAA ee laga heli karo akoonkaaga WA Cares.
- Kala hadlayaa WA Cares wixii ku saabsan arjiga WA Cares, dheefaha, iyo adeegyada.

Isticmaalaha idman ma:

- U maareyn karo dheefahaaga WA Cares adiga ama kuuma gaari karo go'aamada ku saabsan arjigaaga WA Cares, dheefaha ama adeegyada iyada oo aan jirin oggaanshahaaga, heshiiska, oggolaanshaha ama xakameyntaada.
- U saxiixi karo wax arji ah, foomamka, caddeymaha, ama uma geli karo heshiisyo kasta qof oo ay ka mid tahay Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka ama bixiyayaasha adeegyada caafimaadka ama daryeelka muddada-dheer, isaga/iyada oo kaa wakiil ah.

Ma u baahanahay Isticmaalaha Idman?

Maya, lagaaga ma baahna in aad yeelato isticmaalaha idman. Magacaabista isticmaalaha idman waa ikhtiyaari kumana yeellan doonno wax saameyn ah dheefahaaga ama xaq-u-yeelashada. Waxaad iska saari kartaa isticmaalaha idman waqti kasta adiga oo adeegsanaya akoonkaaga WA Cares ee barta internetka ama adiga oo la xiriiraya WA Cares.

Isticmaalaha Idman ma Wakiil Sharci ah baa?

Isticmaalaha idman ma ahan wakiil sharci ah. Si ka duwan wakiilka sharciga ah, isticmaalaha idman ayaa kaliya kaa caawin kara tilmaamaha aad bixisay, mana gaari karo go'aamo ku saabsan arjigaaga, dheefahaaga, adeegyada aad qaadato, ama bixiyayaasha aad adeegyadaasi ka hesho. WA Cares ma aqbali doonna saxiixa isticmaalaha idman, caddeymaha, ama oggolaanshaha beddelkii ka-faa'iideystayaasha.

Haddii aad jeclaan lahayd in aad magacaawdo qof awood u leh in uu go'aamo kuu gaaro, waa in aad bixisaa dokumentiyo sharci ah oo muujinaya magacaabista ee qofkaasi sida wakiilkaaga sharciga ah. Waxaad isticmaali kartaa foomkaaga ama Awoodda Xaddidan ee Wakiilka ah ee loogu talagalay foomka Dheefaha WA Cares Fund.

Ka waran haddii aan horey u lahaa Wakiil Sharci ah?

Haddii aad horey u lahayd wakiil sharci ah, waxaad nuqulka dokumentiyada sharciga ah siin kartaa WA Cares. WA Cares waa in uu galka ugu jiraa nuqulka dokumentigaaga sharciga ah ee wakiilkaaga sharciga ah si uu u maareeyo dheefahaaga isaga oo adiga kaa wakiil ah.



Isticmaalaha Idman

Authorized User



Magaca Ka-faa'iideystaha
Lambarka Aqoonsiga WA Cares (haddii la garanayo)

Buuxi ka-dibna soo gudbi foomkan.	Macluumaadka aad u baahan doonto:
<p>Waxaa jira saddex siyaabood oo lagu buuxinayo laguna soo gudbinayo foomkan:</p> <p>Online-ka: Nuqulka elektarooniga ah ayaa la buuxin karaa lana saxiixi karaa iyadoo loo marayo akoonkaaga WA Cares ee barta internetka ah.</p> <p>Soo-geli: Buuxi ka-dibna saxiix foomkan. Soo-geli akoonkaaga WA Cares ee barta internetka.</p> <p>Boostada ugu dir: DSHS The WA Cares Fund PO Box 45612 Olympia, WA 98504-5612</p>	<ul style="list-style-type: none"> • Magacaaga oo saddexan • Cinwaankaaga iyo lambarkaaga telefoonka • Lambarkaaga Aqoonsiga WA Cares (haddii la garanayo) • Magaca saddexan iyo macluumaadka xiriirka ee isticmaalahaaga idman.
	Waxaan u baahanahay in la iga caawiyo foomkan:
	<p>La xiriir WA Cares si aad caawimaad u hesho: Wac: 844-CARE4WA (844-227-3492) Booqo: www.wacaresfund.wa.gov</p>
	Caawimaad luuqadeed ayaa la heli karaa:
	<ul style="list-style-type: none"> • Adeegyada tarjumaadda luuqadda • Adeegyada luuqadda Dhegoolayaasha • Farta Braille • Garaac isticmaalayaasha TTY/TDD 1-800-833-6384

Macluumaadka Ka-faa'iideystaha		
Magaca saddexan	Lambarka telefoonka	Lambarka Aqoonsiga WA Cares
Cinwaanka waddada	Magaalada	Gobolka Koodhka Degaanka
Cinwaanka boostada (ikhtiyaari ah)	Magaalada	Gobolka Koodhka Degaanka

Macluumaadka Isticmaalaha Idman		
Magaca saddexan	Lambarka telefoonka	Lambarka Aqoonsiga WA Cares
Cinwaanka waddada	Magaalada	Gobolka Koodhka Degaanka

Muddo intee le'eg ayaad doonaysaa isticmaalahaaga idman in uu ku caawiyo?

Hal sano Dhacitaan ma lahan Taariikh cayiman:

Asturnaanta

Xaddidaadaha xeerka HIPAA iyo shuruucda kale ee asturnaanta ayaa WA Cares ka hor-istaaga in uu macluumaadka sirta ah ee akoonka ka-faa'iideystaha ama macluumaadka caafimaadka la ilaaliyo la wadaago qof, haddii ka-faa'iideystaha uu oggolaaday WA Cares fasax gaar ah si uu u wadaago macluumaadkan.

Marka aad ku magacaawdo isticmaalaha idman foomkan, waxaad fasax u siinaysaa WA Cares in uu wadaago macluumaadka uu ilaaliyo HIPAA, oo ay ku jiraan macluumaadka caafimaadka iyo macluumaadka akoonka ee sirta ah, iyo sidoo kale macluumaadka ku saabsan arjiyada WA Cares iyo dheefaha WA Cares, isticmaalaha idman ee magacaaban.



Isticmaalaha Idman
Authorized User



Magaca Ka-faa'iideystaha
Lambarka Aqoonsiga WA Cares (haddii la garanayo)

Oggolaanshaha

Marka aan foomkan saxiixo, waxaan caddeynayaa in:

Aan shakhsiga magaciisa kor ku-xusan u magacaabayaa in uu noqdo isticmaalaha idman si uu igaaga caawiyo dheefahayga WA Cares kaliya sida halkan ku qeexan.

Shakhsiga magaciisa kor ku-xusan ma ahan wakiilkeyga sharciga ah oo ma qaadan karo wax go'aamo ah oo ku saabsan akoonkeyga WA Cares ama dheefaha isaga oo aniga iga wakiil ah iyada oo aan jirin dokumentiyo sharci ah oo muujinaya in shakhsiga uu awood u leeyahay in uu sidaa sameeyo.

WA Cares ma aqbali doonto saxiixa, caddeynta, ama oggolaanshaha shakhsiga magaciisa kor ku xusan ee loogu talagalay metelaadayda iyada oo aan jirin dokumentiyo sharci oo muujinaya in shakhsiga uu awood u leeyahay in uu sidaa sameeyo.

WA Cares waxaa loo oggol yahay in ay wadaagto macluumaadkayga sirta ah, oo uu ka mid yahay macluumaadka ku saabsan arjigeyga WA Cares, dheefaha, iyo macluumaadka caafimaadka la xiriira, ee shakhsiga magaciisa kor ku xusan.

Oggolaanshahan wuxuu dhammaan doonaa taariikhda kor lagu xusay ama haddii aanan awood u lahayn in aan jiheeyo ama tilmaamo siiyo isticmaalaha idman.

Haddii codsadaha uusan awoodin in uu saxiixo, waxaa ay ku calaamadeyn karaan "X" ka-dibna waa in uu saxiixaa markhaati. Si uu u saxiixo wakiil sharci ah, dokumentiyada waa in loo geeyaa WA Cares.

Saxiixa Codsadaha	Taariikh	Magaca Daabacan	Magaalada iyo Gobolka Lagu Saxiixay
Saxiixa Wakiilka Sharciga ah (haddii uu ku habboon yahay)	Taariikh	Magaca Daabacan	Magaalada iyo Gobolka Lagu Saxiixay
Saxiixa Markhaatiga (haddii lagu saxiixay X)	Taariikh	Magaca Daabacan	Magaalada iyo Gobolka Lagu Saxiixay